

Saxiixaasha Qorshe-Hawleedka (Roadmap) Soomaaliyeed, 2012

**Borotakoolka Lagu Dhisayo Baarlamaanka Cusub ee
Federaalka ah ee Soomaaliya**

La guddoonsaday June 22, 2012

Saxiixaasha Qorshe-Hawleedka (Roadmap) Soomaaliyeed, iyagoo ay weli ka go'antahay inay fududeeyaan hirgelinta heshiisyadoodii hore ee lagu gaaray magaalooyinka *Kampala, Muqdisho, Garowe, Gaalkacyo iyo Addis Ababa*, fulinayana amarkii ka soo baxay Dhikreetada Madaxweynaha ee June 22, 2012, waxay halkan ku ansaxinayaan Heshiiska [Borotakoolkan] soo socda ee lagu asaasayo Golaha Ansaxinta Dastuurka ee Dhikreetada lagu sheegay.

QODOBKA 1

Qodobkan wuxuu asaasayaa Baarlamaanka Cusub ee Federaalka ah.

QODOBKA 2

Asaasidda iyo Habka Soo Xulidda Baarlamaanka Cusub ee Federaalka ah

1. Baarlamaanka Cusub ee Federaalka ah wuxuu ka koobnaan doonaa Aqalka Hoose ee lagu magacaabo Aqalka Ummadda iyo Aqalka Sare.
2. Aqalka Ummadda wuxuu ka koobnaan doonaa 225 xubnood.
3. Xilliga kowaad ee Baarlamaanka Cusub ee Federaalka ah, xubnaha Aqalka Sare waxaa lagu saleynayaa 18kii gobol ee jiray oo soohdimahooda la yaqaanay intii ka horeysay sannadkii 1991 ilaa iyo inta laga gaaro waqtiga ay sameysmaan dolwad-goboleedyada hadda jira iyo ku mustaqbalka. **Xilligiisa koowaad** Aqalka Sare wuxuu ka koobnaan doonaa tiro aan ka badnayn 54 xubnood.
4. Magacaabidda Baarlamaanka Cusub ee Federaalka ah wuxuu waafaqsanaan doonaa shuruudaha xulidda iyo shuruudaha kale ee lagu caddeeyay Qodobka 3 iyo XXX. Gudduga Farsamo ee Xulidda wuxuu kaalmo siinayaa Odey Dhaqameedyada sida lagu go'aamiyay Borotakoolka Sameynaya Gudduga Farsamo ee Xulidda (Adopted June 22, 2012).
5. Odey Dhaqameedyada oo la tashanaya qabiilladooda ayaa 225 xubnood u soo magacaabaya Aqalka Ummada tiradaasoo ugu yaraan boqolkiiiba 30 ay noqon doonaan haween. Sidoo kale Odey Dhaqameedyadu waxay 54 xubnood u soo magacaabayaan Aqalka Sare ee Baarlamaanka Cusub ee Federaalka ah, taasoo lagu saleynayo hanaanka metelaadda gobollada eek u qeexan **Qodobka 2.3**.
6. Haddii Gudduga Farsamo ee Xulidda uu go'aansado in magacaabidda qof ama in ka badan ayna waafaqsanayn shuruudaha xulidda, magaca ama magacyada dadkaas waxaa dib loogu celinayaa Odey Dhaqameedyada, waana in la soo gudbiyo musharax ama musharaxiin cusub si loo buuxiyo hanaanka ku qeexan *Warmurtiyeedkii Addis Ababa*.
7. Gudduga Farsamo ee Xulidda wuxuu faafinayaa liiska ugu dambeeyaa ee la baaray taasoo waafaqsan *Warmurtiyeedkii Addis Ababa*.
8. Aqalka Sare wuxuu hawlgalayaa ugu dambeyn 20ka August 2012.

QODOBKA 3

Xubnaha Baarlamaanka Cusub ee Federaalka ah

1. Aqalka Ummadda wuxuu ka koobnaanayaa 225 xubnood kuwaasoo ugu yaraan boqolkiiba 30 ay ahaan doonaan haween.
2. Aqalka Sare ee Baarlamaanka Cusub ee Federaalka wuxuu ka koobnaanayaa tiro aan ka badnayn 54 xubnood, kuwaaso si siman wakiillo uga ahaan doona 18kii ee soohdimhoodii la yaqaanay intii ka horeysay sannadkii 1991.
3. Odey Dhaqameedyada ayaa soo xulaya soona magacaabaya xubin kasta oo ka mid ah Baarlamaanka Cusub ee Federaalka ah, iyagoo adeegsanaya habka awood qaybsiga 4.5, xubin kasta oo baarlamaankana waa in laga helaa shuruudagan—
 - a) Waa inuu ahaadaa muwaadin Soomaaliyed;
 - b) Da'diisu u dhexeysaa 25-75 sanno;
 - c) Haystana ugu yaraan shahaaddada dugsiga sare;
 - d) Horeyna u soo gelin dembi;
 - e) Aan la caddeynin in dhimirkiisu dhimanyahay;
 - f) Inuu dhowro dhaqanka Islaamka; iyo
 - g) Inuu lahaado waaya-aragnimo ku haboon.
4. Guud ahaan, Baarlamaanka Cusub ee Federaalka ah waa inuu ahaado mid loo wada dhanyahay, si ballaarana dadka u metela ayna qaybaha kala duwan ee bulshada Soomaaliyed si guud ah uga muuqdaan.
5. Odey Dhaqameedyada, oo uu taageerayo Guddiga Farsamo ee Xulidda who baaraya musharaxiinta, oo haddana la tashanaya qabiilladooda iyo qaybaha kala gedisan ee bulshada Soomaaliyed, oo ay ka mid yihiin culamaa'udiinka, aqoonyahanada, dhallinyarada, haweenka, ganacsatada, ayaa xubnaha Baarlamaanka Cusub ee Federaalka ka soo xulaya dad ay soo baaray Guddiga Farsamo ee Xulidda.
6. Heshiiska (Borotakoolka) Lagu dhisay Guddiga Farsamo ee Xulidda ayaa qeexaya hawlahu uu qabanayo Guddiga Farsamo ee Xulidda ee la xiriira magacaabidda xubnaha Baarlamaanka Cusub ee Federaalka ah.
7. Sida ku qeexan Heshiiskii Addis Ababa, wixii muran/isafgaranwaa ah ee ka dhasha habka soo xulidda xubnaha Baarlamaanka Cusub ee Federaalka ah waxaa loola noqonayaa Guddiga Dhexdhexaadinta si arrinta xal looga gaaro.

Saxiixayada:

1. Mudane Sheekh Shariif Sh. Axmed
Madaxweynaha Dawladda Federaalka ku Meel Gaarka ah
Dawladda Federaalka Ku Meel Gaarka ah

2. Mudane Shariif Xasan Sh. Aden
Guddoomiyaha Baarlamaanka Federaalka ku Meel Gaarka ah
Baarlamaanka Federaalka ku Meel Gaarka ah

3. Mudane Cabdiweli Maxamed Cali
Ra'iisal Wasaaraha Xukuumadda Federaalka ku Meel Gaarka ah
Dawladda Federaalka ku Meelka ku Meel Garka ah

4. Dr. Cabdiraxmaan Sheekh Maxamed Maxamuud
Madaxweynaha Puntland
Puntland

5. Mudane Maxamed Axmed Caalim
Madaxweynaha Galmudug
Galmudug

6. Sheekh Maxamed Maxamuud Yuusuf
Wakiilka Ahlu Sunna Wal Jamaaca
Ahlu-Sunna Wal Jamaaca

7. Dr. Augustine Mahiga
Wakiilka Gaarka ah ee
Xoghayah Guud ee QM ee Soomaaliy

Somali Roadmap Signatories, 2012

Protocol Establishing the Somali New Federal Parliament

Adopted June 22, 2012

The Somali Roadmap Signatories, committed to facilitating the implementation of their previous agreements adopted at *Kampala, Mogadishu, Garowe* and *Galka'yo and Addis Ababa*, carrying out the directions given by Decree of the President on June 22, 2012, hereby adopt the following Protocol to establish the Constituent Assembly referred to in that Decree.

ARTICLE 1

The New Federal Parliament

This Protocol establishes the New Federal Parliament. ARTICLE 2

Establishment and Selection Process of the New Federal Parliament

1. The New Federal Parliament shall comprise of a Lower House termed the House of the People and an Upper House.
2. The House of the People shall consist of 225 members.
3. During the first term of the new Federal Parliament, the composition of the Upper House shall be formed on the basis of the 18 Regions based on the regional demarcations before 1991 until such time as present and future federal states form. The Upper House during its first term shall consist of a maximum of 54 members.
4. The nominations for the New Federal Parliament shall comply with the selection criteria and other requirements stated in this Protocol and the companion Protocols. The Technical Selection Committee will assist the Traditional Leaders as determined by the Protocol Establishing the Technical Selection Committee June 22, 2012.
5. The Traditional Leaders shall consult with their clans and shall nominate 225 members for the House of the People of which at least 30 percent shall be women and 54 members for the Upper House of the New Federal Parliament based on the regional representation stipulated in Article 2.3.
6. In the event that the Technical Selection Committee determines that a nomination or nominations do not conform to the objective selection criteria, the name or names will be sent back to the Traditional Leaders and a new candidate or candidates must be submitted so as to complete the process as stipulated by the *Addis Ababa Communiqué*.
7. The finalized and fully vetted nomination list of the New Federal Parliament shall be published by the Technical Selection Committee in accordance with the *Addis Ababa Communiqué*.

ARTICLE 3

New Federal Parliament Members

1. The House of the People shall comprise 225 members of whom at least 30 percent must be women.
2. The Upper House of the New Federal Parliament shall comprise no more than 54 members, which should represent the 18 regions based on the regional demarcations before 1991 on an equal basis.
3. Each member of the New Federal Parliament shall be selected and appointed by the Traditional Elders , based on the 4.5 formula, and each must—
 - a) Be a Somali citizen;
 - b) Be aged between 25-75 year;
 - c) Have a minimum secondary school education;
 - d) Not have a criminal record;
 - e) Not be declared mentally incompetent;
 - f) Must respect Islamic values; and
 - g) Must have relevant experience.
4. Collectively, the New Federal Parliament must be inclusive, broadly representative and generally reflect the composition of Somali society.
5. The Traditional Leaders, supported by the Technical Selection Committee who vets nominees, and in consultation with their clans and with different sectors of Somali civil society, including religious leaders, intellectuals, youth, women, and business people, shall select the members of the New Federal Parliament from among persons whom the Technical Selection Committee has vetted.
6. The Technical Selection Committee's functions in relation to the nomination of the New Federal Parliament are stated in Protocol Establishing the Technical Selection Committee.
7. Any dispute during the selection process for members of the New Federal Parliament shall be referred to the Elders Arbitration Board for resolution as set forth in the Addis Ababa Agreement.

Signatories:

- 1: Transitional Federal Government
President of the Transitional Federal Government
Hon. Sheikh Sharif Sheikh Ahmed

2. Transitional Federal Parliament
Speaker of the Transitional Federal Parliament
H.E Sharif Hassan Sheikh Aden

3. Transitional Federal Government
Prime Minister of the Transitional Federal Government
H.E Dr. Abdiweli Mohamed Ali

4. Puntland
President of Puntland
Dr. Abdirahman Sheikh Mohamed Mohamud

5. Galmudug
President of Galmudug
Mohamed Ahmed Aalim

6. Ahlu-Sunna Wal Jamaaca
Representative of Ahlu Sunna Wal Jamaaca
Sheikh Mohamed Mohamud Yusuf

7. Special Representative of the
Secretary General of the UN Somalia
Dr. Augustine Mahiga